

Ka Hirgelinta Magaalada oo dhan Guryo Khasab ah oo la Awoodi Karo

Oo ku waajibinaya dhisayaasha iney ku deeqaan guryo la awoodo iyadoo Seattle sii koreysa

Guryaha Khasabka ah ee la Awoodi karo waxey hubinayaan in dhismayaasha isugu jira ganacsiga iyo famillay isku dhafka ah ay noqdaan kuwo qeyb ka noqda kororka guryaha la awoodo. Barnaamijka Guryaha Khasabka ee la Awoodo wuxuu soo kordhinayaa 6,000 guryo cusub oo la xaddiday, guryo dakhli ahaan-xaddidan oo loogu talo galay dadka dakhligoodu hooseeyo. Waxyaabaha looga baahan yahay guryo la awoodi karo waxey hirgalayaan marka Golaha Deegaanka Magaalada ay go'aamiyaan sooneynta cusub (new zoning) taasi oo wax ku soo kordhin doonta tayada dhisayaasha. Iyadoo la hirgelinaayo waajibaadka guryo la awoodo iyo iyadoo isla markaana la eegayo kordhinta tayada dhismayaasha, MHA waxey tahay mid la saan qaadeysa talaabooyinka la isku raacay ee gobolka Washington soo jeediyey loogana dhaqmo magaalooyinka kale ee gobolka.

Ka dib markii MHA laga dhaqan geliyey 6 xaafadood oo Seattle ah 2017, Magaaladu waxey soo jeediyaa in lagu ballaariyo MHA guud ahaan magaalada oo dhan. Talo soo jeedinteenno waxey beegsaneysa hirgelinta noocyo kala duwan oo guryo ah oo ku dhow hantida bulshada, sida basas is daba jooga, beeraha nasiinada, iyo shaqooyinka. Waxan soo jeedineynaa isbeddel aan la yara dareemin oo lagu sameeyo meelaha khatarta sare ee barakicintu ka jirto, meelaha laga dareemayo isbeddelka cimilada, iyo meelaha ay ku yar yihiin hantida bulshada. Joqraafiga meelaha talo soo jeedinta sooneynta saameyneyso waxa laga heli karaa www.seattle.gov/hala.

Talo soo jeedintani waa miro ka dhashay ku lug yeelasho socotay in ka badan muddo labo sannadood ah waxana ay ka tarjumeysaa halku-dhegyada aan ka maqalnay komunitayada:

- Abuurista guryo badan oo la awoodi karo oo loo xaddiday dadka dakhligoodu hooseeyo.
- Yareynta barakicinta kuwa hadda guryaha deggan.
- Taageeridda guryo kala duwan, oo ay ku jiraan guryo iibsi ama mulking iyo guryaha qoysaska ballaaran.
- U abuuris fursado badan dadka ku ag nool beeraha nasiinada, iskuullada, iyo xarumaha bas raaca.
- Isku xirka horumarka iyo maalgelinta kaabayaasha



MHA waxey qeyb ka tahay Agendaha Seattle Awoodista iyo Noolaanshaha (HALA) kaasi oo ku dadaalaya in la abuurto 50,000 guryo marka ay tahay 2025, oo ay ku jiraan 20,000 guryo la awoodo ah. Dhisidda labaduba guryo la awoodo iyo kuwo qiimaha suuqa lagu kireeyo waxay muhimmad u leedahay istraatiijiyada lagu yareynayo kororka qiimaha iyo helidda kala doorasho ballaaran ee guryaha ah.


Qorista Talo Soo Jeedinteena

La xiriirka bulshooyinka iyo go'aanka naga go'an ee u sinnaanshaha midab-takoorka iyo sinnaanta bulshada ayaa saldhig u ah qaabeynta talo soo jeedinteena ku aaddan hirgelinta MHA. Arrimaha furaha u ah talo soo jeedinteena waxa ka mida:

- Waa in codsiga waxyaabaha looga baahan yahay soonayaasha guryaha qoysaska kala duwan iyo rugaha ganacsiga, iyo dhammaan xaafadaha magaalooyinka, la socdaan Qorshaha Dhan ee Seattle 2035 (Seattle 2035 Comprehensive Plan) oo ka soo baxay Golaha Deegaanka.
- Kordhinta guryo kala doorashada guud ahaan Seattle, siiba guryo badan halka ay ku yar tahay meelaha ay ka jirto khatarka barakicinta iyo ay ku badan tahay helitaanka fursadaha (Basaska, beeraha nasiinnada, shaqooyinka, iyo ilaha kale ee aadka loogu baahi qabo).
- Meelaha ay ka jirto khatarta aadka u daran ee barakicinta ee dadka dakhligoodu yar yahay iyo bulshooyinka midabka leh, waa in diiradda la saarayaa badinta guryo kala nooc ah iyo shaqooyin 5 daqiiqo loo socon karo ee ku dhow basas isdaba joog ah.
- Ballaarinta 10 xaafad magaalada si ay u soo kordhiyaan guryo badan oo 10 daqiiqo u jira xarumaha basaska si joograda ah u socda.

Xaafadaha Magaalo ee Seattle

1994tii, Seattle waxey hirgalisay istiraatiijad ku jeedda xaafadaha magaalo si ay u daadaheeyso korriimo iyo maalgelino loo qoondeeyey bulshooyinka magaalada oo dhan. Korriimada iyo Kala Dhig-dhigidda Saami Qeybsiga Qorshaha Isku Dhan ee Seattle 2035 wuxuu si gaara u eegay tirada dadka, dhaqaalaha, iyo waxyaabaha la taaban karo si uu u fahmo khatarta hadda jirta ee baro kicinta iyo ka helidda fursado xaafadaha magaalo ee Seattle.



- Yareynta saameynta isbeddelka cimiladu ku leedahay meelaha xasaasiga ah soona jeedi in aan isbeddel xooggan lagu sameynin wixii 500 oo cagood u jira waddooyinka faree wayiska ah.
- Mideynta heerarka naqshadaha cusub loogu talo galay daaraha si loo yareeyo saameyteda dabeecadda ama aragga xaafadda.
- Horumarinta Qodobka Cagaaran iyo lagama maarmaanimada dhirta si loo teegeero yoolalka bey'adda.
- Is beddel inaan lagu sameynin meelaha federlaalku u qoondeeyey xaafado taariikhi ah iyo dhul xeebeedka mudnaanta sare la siiyey.

Waxayaalaha laga doonayo dhismaha guryo la awoodo

Iyadoo la kaashanayo MHA, dhismayaasha cusub waxa ku waajib ah iney ku daraan guryo la awoodo (soo bandhigid ikhtiyaari ah) ama ku soo biirineysa dhaqaale Xafiiska Guryaha ee Seattle si loo taageero horumarin guryaha la awoodo (bixin ikhtiyaari ah).

Shuruudaha MHA ee Guryaha waxey u kala duwan yihiin sida qiimaha goob kasta oo ka mida magaalada iyo mugga isbeddelka soonaha. Shuruudaha sare MHA waxey ku wajahan yihiin meelaha guryaha qiimahooda ku sarreeyo iyo sida ay u wayn tahay isbeddellada soonayaasha.

Iyadoo la kaashanayo isbeddelka soo bandhigidda ikhtiyaaraka ku dhisan, inta u dhaxeysa boqolkiiba 5 ilaa 11 boqolkiiba ee deegaannada guryaha famillada kala duwan waxa loo qoondeeyey qoysaska dakhligoodu yar yahay.


Iyadoo la kaashanayo lacagta bixinta ikhtiyaariga ah, dhisayaasha waxey ay ku deeqi doonaan inta u dhaxeysa 5 ilaa 32 doolar iyo 75 senti halkii cag ama foot.

Sida Canshuurtii Guryaha Seattle, lacag siinta MHA waxaa loo adeegsadaa guryaha ku yaal dhammaan Seattle. Tani waxey kaloo taageereysaa faa'iidooyin kale, oo ay ku jiraan u adeegidda dadka dakhligooda yar yahay, siineysana guryo qoysaska loogu talo galay, iyo siinta fursado bulshooyinka jecel guryaha iyo adeegyada dabaqa koowaad ku yaal.

Xaggee bay ka hirgeli kartaa MHA?

Isbeddel lagu sameeyo sooneyaasha loo hirgeliyo Guryaha la Awoodi ee Khasabka ah

- Meelaha loo qorsheeyey fulinta MHA
- MHA waa mid jirta oo shaqeyneysa
- MHA looma baahna
Looma baahna isbeddel soone



Yaa u qalma guryaha qiimaha jaban ee laga abuuray MHA

Dakhliga iyo Kirada Xaddidan ee 2017



Qofka

Sameeya wax ka yar 40, 320 doolar wuxuu bixinayaa wax aan ka badneyn 1,008 doolar hal qol.




Qoys Afar ah

Sameeya in ka yar 57,600 oo doolar waxey bixin doonaan wax aan ka badneyn 1,296 doolar laba qol.

Labo sano oo bulsho ku xirnaasho ah

MHA waxaa la qaabeynayey labo sano ku dhowaad oo ku xirnaasho bulsho ah oo ay hoggaamineysay Waaxda Xaafadaha (DON). Mabaadii'da ay soo saareen bulshooyinka, sida curinta u gudub u dhaxeeya meelaha sida sare ama hoose loo deggan yahay, oo ay hoggaanka u heysay talo soo jeedinteenii ugu horreysay ee la soo saaray 2016. Marka laga soo bilaabo xilligaa, la xiriiris dheeri ah iyo dib u eegis bey'adda oo ku qaabeysan taloo see jeedinteenii ugu dambeysay. Habkeenii qadiimiga ahaa iyo habka cusub ee la xiriirka farsameysan waxa ka mid ahaa:

- Wada hadal onleen oo ku dhisan is dhex gal hala.consider.it oo ay ka mid yihiin 2000 xubno bulshada ah
- Telefoon qaabka town hall oo lagula xiriiray in ka badan 70,000 guryo Seattle
- Waraaqo u diris 90,000 guryo si loola wadaago warbixinno iyo in lagu casumo qoysaska kulanno dadweyne.
- Albaab garaacis in ka badan 10,000 guryood oo ku yaal sooneyaashooda in la beddelo la soo jeediyey.
- Wargeysyo iimeel loogu diray 4,700 qofood.



Tallaabooyinka Xiga

Laga soo bilaabo 2015 ilaa 2017, Guud ahaan magaaladu waxey si buuxda ugu codeysay iney abuurto waxyaabaha looga baahan yaha MHA iney dib u sooneyso bulshooyinka soo socda: University District, Downtown, South Lake Union, Chinatown-International District, oo ku teedsan waddada 23rd ee u dhaxeysa Central Area, iyo Uptown.

2018, Golaha Deegaanka, oo taageero ka heysta shaqaalaha Magaalada, waxey sii wadi doonaan iney ku xirnaadaan bulshooyinka iyadoo laga fakarayo sida MHA looga hirgelin lahaa magaalada oo dhan. Goluhu wuxuu daaha ka qaaday liiska guryaha furan iyo dhageysiga guud ahaan magaalada bisha Agos oo dhan si loo helo codad dheeri ah oo qaabeyn doonta talo soo jeedinta.

Ka baro howlaha Golaha Deegaanka ee ay guud ahaan magaalada ka wadaan
www.seattle.gov/council